# Xiriirinta daryeelka caafimaadka ee Ururka Laanqeyrta Cas

Waxay kalkaalisooyinka caafimaadku agteenna ka shaqeeyaan in ay caawimaad iyo taageero u fidiyaan dadka waraaqo la'aanta ah iyo qaxootiga kale ee bannaanka ka ah nidaamka badbaadada ee bulshada.

## Waxaan kaa caawineynaa inaan

- Kuu tilmaanno, kulana xiriirinno laantaada caadiga ah ee caafimaadka si aad adigaaga waraaqo la'aanta ahi u hesho daryeelka caafimaadka ee aad xaqa u leedahay.
- Ku taageerno adigaaga waraaqo la'aanta ah ee caqabadaha kala kulmaya xagga xiriirka laamaha caafimaadka.
- Ku taageerno adigaaga daryeel bix-iyaha ah ee xiriirka la leh kooxaha bukaanka ee kor ku xusan. Gudbinta macluumaad dadaal kor qaadid ah oo loogu tala galay goobaha shaqada.
- Kula xiriirinno cilmibulshayahan loogu tala galay adigaaga waraaqo la'aanta ah ee qaba su'aalo ku saabsan taageerada bulshada.

## Rugta qaabilaadda

Waxaa ballan la'aan noola imaan karaa Talaado – Khamiis, saacadaha 09:00 – 12:00 iyo 13:00 – 16:00.
Cinwaanka: Rullagergatan 6B, Gamlestaden, Göteborg.
Sidoo kale ballan waa la sii qabsan karaa.

## Tala bixin qaran

Waqtiga taleefanka: Isniin – Jimco, saacadaha: 09: 00 – 12:00
Taleefan nambar: 020-211000

Waxaad sidoo kale farriin qoraal ah u diri kartaa 072-349 98 08
Cinwaanka e-mailka: papperslos@redcross.se

In nala soo booqdo ama in nala soo waco waa lacag la'aan. Waxaa na saaran waajib sir qarin.

## Macluumaad dheeri ah

Iyadoo lala shaqeynayo ururrada kale ee rayidka ah ayey jirtaa fursad kalkaalisooyinka caafimaadka ee daryeel gudbiyayaasha lagula kulmi karo goobo badan oo ka mid ah gobalka Västra Götaland, iskaan-garey koodka QR-ka si aad u aragto meelaha nagala heli karo ee gobalka.

Wixii dheeri ah ee ku saasban daryeelka loogu tala galay dadka waraaqo la'aanta ah iyo qaxootiga kale ka akhriso boggan, waxaa sidoo kale bogga ku jira macluumaad luqado badan ku qoran oo ku saabsan xaqa aad adigaaga waraaqo la'aanta ahi u leedahay daryeel caafimaad.

Macluumaad ku socda shaqaalaha caaafimaadka. Marka aad daryeel caafimaad raadsaneyso waxaad tusi kartaa macluumaadkan.

Svenska Röda Korset

Medfinansieras av Europeiska unionen

Version 2025-06-25

Form: Heed & Heed. Illustrationer Sabina Helmola. 260701. Redigerad 251111 Lau Dahlgren Ekegren

# Kugu socota adigaaga waraaqo la'aanta ah

## ee ku sugan Gobalka Västra Götaland



Macluumaad khuseeya daryeelka caafimaadka ee kooxaha kale ee qaxootiga ah

Macluumaad ka socda Xiriirinta Daryeelka Caafimaadka ee Västra Götaland, iskaashi ka dhexeeya Hey'adda samafalka ee Rosengrenska, Ururka Laanqeyrta Cas iyo Gobalka Västra Götaland

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN

ROSENGRENSKA STIFTELSEN

Svenska Röda Korset

# Gobalka Västra Götaland

*Dhammaan* carruurta waraaqo la'aanta ahi waxay dareyeel caafimaad xaq ugu leeyihiin si la mid ah carruurta diiwaangashan.

Adigaaga ka weyn 18 sano ee sharci la'aanta kula nool Iswiidhan waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaad iyo daryeel caafimaad oo aan dib loo dhigi karin. Waxay taasi ka dhigantahay inaad xaq u leedahay

- Daryeelka xaalahada degdegga ah (daryeel caafimaad oo toos ah)
- Daryeelka hooyada iyo dhallaanka iyo daryeel dhalitaan
- alooyin ku saabsan sida uurka loogu hortago (sida leesaga ilaaliyo in uur la qaado)
- Daryeelka caafimaadka ee marka ay ilmo qofta ka soo hallaabaan ama laga soo rido (in uur la soo afjaro)
- Daryeelka iyo ka daweynta cudurro iyo dhaawacyo ay xitaa dib u dhigid yari keeni karto caawaqib aad u xun
- Daryeel ka hortegi kara in xaaladdaadu ay sii xumaato
- Daryeel ka hortegi kara in loo baahdo daryeel iyo daweyn aad u ballaaran
- Daryeel daba socda daryeel caafimaad oo horay laguu siiyay, xitaa daryeel caafimaad oo dhimirka la xiriira

## Waxaad sidoo xaq u leedahay

- Baaritaanka caafimaadka ee xarunta caafimaadka
- Safarro bukaan
- Dawooyinka ka midka ah dawooyinka ay dabooleyso kaalmada dowladdu
- Qalab kaalmaati ah

Kuwani waa daryeel caafimaad oo laguugu siinayo laamaha caafimaadka ee uu leeyahay gobalku. Micnaha xaruntaada caafimaadka, xarunta caafimaadka ee hooyada iyo dhallaanka, rugaha qaabilaadda ee xaaladaha degdegga ah ama isbitaal.

Caruurrta waraaqo la'aanta ahi waxay si la mid ah carruurta diiwaangashan xaq ugu leeyihiin daryeelka caafimaadka ee ilkaha. Dadka ka waaweyn 18 sano waxay xaq u leeyihiin daryeel ilko isla markaas ah iyo daryeel ilko ee aan dib loo dhigi karin. Ilaa iyo sanadka aad buuxineyso 20 sano waa lacag la'aan daryeelka ilkuhu. Laga billaabo sanadka aad buuxineyso 20 sano waxaad dhiibeysaa 50 koron booqashadiiba.

Marnaba laguuma diidi doono daryeel caafimaad ilaa iyo inta aad kala kulmeyso kalkaaliso caafimaad ama taqtar qiimeyn ku sameeya baahidaada daryeelka caafimaadka. Waxay taasi ka dhigantahay inaan marnaba xafiiska qaabilaadda laguugu diidi karin daryeel caafimaadka. Marnaba uma baahnid inaad caddeyn u keento inaad tahay qof waraaqo la'aan ah.

> Haddii aad rabto inaad la xiriirto mid ka mid ah waaxaheenna qaxootiga, si aad tusaasle ahaan u hesho macluumaad ku saabsan baaritaannada caafimaadka, waxaad kala xiriiri kartaa:
>
> **Rugta qaabilaadda ee caafimaadka qaxooxtiga**
> Waqtiga taleefanka: 09.00–15.00
> Taleefanka: 031-747 89 50
>
> **Rugta qaabilaadda ee carruurta qaxootiga**
> Waqtiga taleefanka: 08.00–10.00
> Taleefanka: 070-020 60 26

Rugta qaabilaadda ee carruurta qaxootigu waxay qaabileysaa carruurta iyo dhallinyarada qaba caafimaad darrada xagga jirka ama maskaxda, ka dib marki ay soo mareen qaxa iyo socdaalka. Waxaad iyaga ka heli kartaa taqtar carruur, taqtarka dhimirka carruurta, cilminafsiyahan iyo kalkaalisooyin caafimaad oo leh takhasus gaar ah. Waxay la kulmaan carruurta, waaliddiinta, mararka qaarna qoysaska oo dhan. Si aad u timaadid rugta qaabilaadda waxay xaruntaada caafimaadku u baahantahay in ay ku soo gudbiso. Adiguna xitaa waad isi soo gudbin kartaa.

## Macluumaad dheeri ah

Talabixinta daryeelka caafimaadka ee 1177
Macluumaad ku aaddan daryeelka caafimaadka ee laguugu tala galay adigaaga waraaqo la'aanta ah ama megengelyo doonka ah

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN

# Rosengrenska

Rosengrenska waxaa loogu tala galay adigaaga waraaqo la'aanta ah. Waxaan wax qaabilnaa hal galab oo usbuuc dhaaf ah.

**Rosengrenska waxaad caawimaad uga heli kartaa:**

## Kalkaaliso caafimaad, taqtar ilko ama cilminafsiyahan

Rugta qaabilaadda ee Rosengrenska waxaad kula kulmi kartaa kalkaaliso caafimaad, taqtar ilko ama cilminafsiyahan haddii aad u baahantahay daryeel caafimaad laakin aadan aqoonnin meel aad la xiriirto, aadan aqoonnin sida uu u shaqeeyo nidaamka caafimaadka ee Iswiidhan, haddii si fool xun laguugu qaabilay laamaha caafimaadka, laguu diiday daryeel caafimaad ama ay lamaha caafimaadku lacag qalad ah kugu soo dallacdeen. Haddii aad u baahantahay daryeel caafimaad ama daryeel ilko waxaa macluumaad lagaa siinayaa sida aad kula xiriiri karto daryeel bixiyahaaga iyo sida aad ku heli karto meesha saxda ah ee daryeelka caafimaadka.

## Qasnadda

Waxaad halkan ka heli kartaa in laguu soo celiyo lacagti daryeelka caafimaadka iyo dawooyinka uu taqtarku kuu qoray ee aad iibsatay. Waxaad u baahantahay inaad wadato rasiidkii lacagta.

## Ookiyaalayahan

Ookiyaalayahan ayaa hal mar bishiiba goob joog ku ah Rosengrenska. Ookiyaalayahanku wuxuu kaa caawinayaa baaritaanka indhaha, wuxuuna ku siinayaa ookiyaalo lacag la'aan haddii aad u baahantahay.

## Taageero bulsho

Waxaan la shaqeynaa kaniisad Göteborg ku taalla. Iyadoo loo eegeyn diinta ama waxa aad aaminsantahay waxay wadaaddaha kaniisaddu kugu casuumayaan wadahadal, taageero iyo talabixin. Waxay taasi ku saabsanaan kartaa arrimo ku aaddan carruurta iyo qoyska, iskoolka carruurta, caawimaadda bacda cuntada iyo dhar ama jiheynta bulshada. Waxaa sidoo kale jirta fursad ku aaddan wadahadal iyo taageero laga helo baadare ama xiriir lala yeelanayo golaha xiriirka diimaha ee Göteborg.

## Garyaqaan

Waxaan wada shaqeyn la leennahay garyaqaanno dadka siiya tala bixin lacag la'aan. Sida ugu fiican oo lagu heli karo garyaqaannadu waa in ballan laga ag qabsado iyadoo e-mail loogu dirayo info@rosenjuristerna.se ama iyadoo lagala xiriirayo boggooda intarnetka ee rosenjuristerna.se ama liiska rugta qaabilaadda ee Rosengrenska. Markaas way kula soo xiriiri doonaan si aad iyaga u booqato.

## Sidee baad nagula soo xiriiri kartaa

Si booqadayaasheennu ay kalsooni u dareemaan ma qoreyno waqtiga iyo goobta qofka lagu qaabilay.

> Haddii aad u baahantahay macluumaad ku aaddan meesha nagala helo kala xiriir xiriirinta daryeelka caafimaadka ee Ururka Laanqeyrta Cas 020-211000.

## Macluumaad dheeri ah

Wixii dheeri ah ee ku saabsan Ururka Samafalka ee Rosengrenska ka akhriso

ROSENGRENSKA STIFTELSEN